Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimmaha siyaasada Soomaaliya (UNPOS)

**Warqad ku socota Jaaliyadda Soomaaliyeed ee ku nool dalka dibadiisa (No. 14)**

**Nairobi, 7 Maajo 2009**

**As-salaamu Alaykum**

1. Ilaa iyo intaan idin soo direy warqadaydii ugu dambaysay oo laga joogo muddo hal bil ah, arrimo horumar leh ayaa soo kordhay. Wadankiina wuxuu weli ku jiraa xilli kala guur ah, inkastoo xaladda ay hadda soo wanagsananayso, hadana waddanka wuxuu idinkaga baahan yahay ka warqab iyo taageero joogta ah.

2. Shirkii lagu taageeraayey hay'adaha nabadgelyada u qaabilsan Soomaaliya ee qabsoomay 22-23kii Abril, kana dhacay Brussels ayna wada shir- gudoominayeen Qaramada Midoway iyo Ururka Midowga Africa, waxaa uu ahaa shir Soomaaliya, xukuumadeeda iyo dalkeedaba, wanaag u soo kordhiyey. Waa markii ugu horeysay ee shir heerkii ugu sareeyey ah ee bulshada caalamka ay kuga soo qaybgasho sida Xoghaya Guud ee Qaramadda Middoway, BAN KI-MOON, Gudoomiyaha Ururka Midowga Africa, JEAN PING, Madaxweynaha Ergada Reer Yurub, Jose Manuel Barroso, Ergayga Sare ee Reer Yurub u qaabilsan Siyaasada iyo Nabadgelyada loo dhan yahay, Javier Salona, Guddomiyaha Midowga Reer Yurub u qabilsan Arrimaha Horumarinta iyo Kaalmada Bani'aadanimada, Louis Macheil, Kuxigeenka Ururka Jaamaca Carabta Axmed Benhelli, Kuxigeenka Xoghayaha Guud ee Uruka Islaamka Aduunka, Atta Bakheet Manane iyo Wasiiro kale oo aad u tiro badan. Isugeyn, tiro garayso illa 60-dal iyo ururo aad u fara badan oo ay ka mid tahay IGAD ayaa ka qeybgalay shirkaas, kuwaasoo balan qaadkooda maaliyadeed uu gaaraayey in ka badan 213 million oo Dollar loona balan qaaday hay'adaha nabadgelyada u qaabilsan Soomaaliya iyo howlgalka ururka Midowga Afrika ee Soomaaliya (AMISOM). Taageeradan ee aan horey loo filaynin ee diplomasiyadeed iyo dhaqaaleba waxay cadeyn u tahay danaynta cusub ee bulshada Caalamka uhasyo in nabad iyo xasilooni la gu soo cveliyo Soomaaliya.

3. Waxaa mahad leh Heshiiskii Jabuuti, Soomaalidu ha ahaadeen kuwa dalka gudahiisa jooga iyo kuwa dibadda jiraba waxay bilaabeen inay guryahooda ku soo noqdaan. Sidoo kale, madaxdii ugu dambaysay ee dalka ka carartay 2006dii ayaa iyagana soo noqday. Tani waa talaabo nageesinimo gelinaysa lehna rajo iyo kalsooni kana mid ah geedi socodka nabdda. Waxa kale oo ay arrintani caddeyn u tahay in aad noqon kartid waddani loona baahneen in aad qas dib ugu noqotid si aad arrintan u cadaysid. Heshiskii Jabuuti waxaa oo uu dadka tusay in kala duwanaashaha siyasadeed logu xalin karo wadahadal. Xiriirka ka dhexeeya walaalaha waa in uu

ahaadaa wada hadal waana in uusan ahaanin isdil oo keliya. Anigoo ah Ergayga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud waxaan dib u xaqiijinayaa inaan diyaar u ahay inaan kaalmo geysto. Waqtigii hore ee gacan ka hadalka ku dhisnaa waa in uu dhamadaa. Haddaan arin kale tilmaamo maadaama ay muuqato dadaalka amaanta mudan leh ee ay muujiyeen ciidamada Brundi iyo Uganda, dilkii shalayto la dilay askari ka tirsanaa ciidamada AMISOM maahan mid la ogolaan karo.

4. Falalka burcad-badeednimo ee weli sii socda waa arrin qalbi-jab leh, anigana waxaan marlabaad idin leeyahay cambaareeya ficilkaas. Dhab ahaantii ma aha shakhsiga ee waa mas'uuliyada xukumadda, in ay dhaqan geliso sharciga si wax looga qabto kalumaysiga sharci darrada ah, ama ku qubista waddanka lagu qubayo wasakhdda. Waa in la tilmaamaa lana ogaadaa waxyaabaha uguxun ee ka dhalan karta burcad-badeednimada in ay tahay in Saomaaliya lala xiririnaayo inay tahay wadan ay fowdo ka jirto. Ilaa iyo inta falka burcad-badeednimada sii socda, aduunka fikrad xun ayuu ka sii qabayaa Soomaaliya, in kastoo horumar uu ka socda dhinaca Siyaasada iyo Nabadgelyada. Dhibaatada aadka u saraysa ee ay la kulmayaan burcad-badeeda iyo taageerayaashooda awgeed, falka burcad- badeednimada mar dhow wuu iska dami doonaa. Dhinaca kale, sababaha dhaqaale ee ka dambeeya falka furcad-badeednimada waa in wax laga qabtaa, lana kaalmeeyaa ummadda ay waxyeelada ka soo gaartsay, talaabo sharci ahna laga qaadaa burcad-badeedka, lana baaraa lacagta la is dhaafsanaayo, ugu dambeyntiina waa in la adeegsadaa dhamaan wixii surrtagal si niyad iyo ficil ahba.

5. Laga soo bilaabbo markii la dhaariyay 27 Febraayo 2009, xukuumadu waxa ay hadda jiraata oo keliya muddo 2 bilood wax yar un kabadan. Labaatan 20-sano o dagaal ah kadib, mudadani waa muddo aad ugu yar hogaanka cusub si uu wax uga qabto dhibaatada jirta oo dhan. Dhamaan Ummadda Soomaaliyeed waa in ay wakhti dheeraad ah iyo gacanba siiyaan xukuumada si ay si buuxdo ugu shaqayso. Waqtigan xasaasiga ah ee ka mid ah taariikhda waddankiina, hay'adaha ka jira waddanka waxay u baahan yihiin kaalmada waxtarka leh ee dhamaan muwaadiniinta wadanka gudihiisa ama dibaddiisaba joogta. Hadda waxaad haysataan fursad aad naftiina iyo aduunkuba ugu cadeeysaan inaad magaca wadankiina iyo tan ummadiinaba aad danayneysaan. Hogaan cusub ayaa hadda dalka ka samaysmay. Wasiirro iyo xildhibanno badan kama aysan qeyb gelin xukuumaddii dhacday 1991.qaar ka mid ahna waxayba ka yimadeen dalka dibaddiisa. Wax kastaba horey ha u ahadeene mas'uuliyiinta aan ka hadlayno waxay ka tarjumayaan Soomaalida maanta.. Ayagoo wada jira ayey u howlgaleyaan sidii lagu heli lahaa nabad iyo xasilooni waana in la dhirigeliyaa lana taageeraa.

6. Saaxiibayaal, wadankiina weli dhibaato ayaa haysata waana idin baahan yahay. Waxaana ugu baqayaa mid kasta oo idinka mid ah in uu guto mas'uuliuyadiisa ka muwaadin Soomaali ahaan si wadankiina mar labaad cagahiisa ugu istaago. Midkasta oo idinka mid ahna isbedel ayuu samayn karaa, sidoo kale mid kasta oo idinka mid ahna wuxuu go'aansan karaa inuu ka mid noqdo isbedelka dhinaca wanaagsan loo qaadaayo. Soomaaliya waa in ay mar labaad ugu soo noqotaa meeshay dunida kaga jirtay. Ruux kasta oo Somaali ah wuxu ka fikirayaa goortay Soomaaliya noqon lahayd waddan caadi ah oo ay nabadi ka jirto sida wadamada kale oo leh hay'adaha addeega bulshada iyo kan gaarka ahba leh, safaarado, bangiyo, shirkado isku dhaf ah, shirkado caalami ah ee diyaaradeed oo ku xerayso dunida inteeda kale. Qaar badan oo idinka idiin ka mid ah ayaa wadamada ay ku noolyihiin ku haysta

nabadgelyo. Waxaad hadaba xaq u leedahiin xurmada iyo nabadgelyada aa ku haysataan wadamada aad ku nooshahiin in aad ku heshaan waddankiina. Waxaan hadda joognaa waqtigii haddalka ficilka loo bedeli lahaa.

7. Dadkiina waxay doonayaan in ay waqtigii dagalka ku dhisnaa ay dib iska mariyaan. Waxaay doonayaan inay horseedaan nolol caadi ah. Kuwa doonaya in ay wax dilaan waa in ay katanasulaan falkaas ayna Somaliya mustaqbal wanagsan u raadiyaan. Waxaan idinkugu baqaya in tirahdaan MAYA sii socoshada iska horimaadka aadna saladda Jimcaha soo socota (berri) ee aad tukan doontaan aad Illahay ka baridaan sidii nabad iyo sharafi ugu soo noqon lahayd wadankiina meel kasta ee aad joobtaan.

Walaalkiina,

Ahmedou Ould-Abdallah